# Ogeysiiska Takoorid-la'aanta: Takooriddu waxay ka soo Horjeeddaa Sharciga Barnaamijyada La-xiriira Daryeelka Caafimaadka

**(Nondiscrimination Notice: Discrimination is Against the Law Health Care-Related Programs)**

Wisconsin Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) waxa ay raacdaa sharciyada xuquuqda madaniga ah ee Federaalka oo qofna looma takoori karo wax ku saleysan isir, midab, asalkiisii hore, da', naafanimo, ama jinsi (sida haweeneey uur leh, jinsiga uu qof isu aqoonsan yahay, iyo dookhiisa lammanaha), caqiido diin ahaaneed, naafanimo, da', siyaasad qofku aamminsan yahay, aargoosi ama dacwo ah xuquuqda madaniga oo la xiriirta wax kol hore dhacay. Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) qofna wax uguma diidi karto ama ulama dhaqmi karto si dadka ka duwan iyada oo ay ugu wacan tahay isir, midab, asalkiisii hore, da', naafanimo, ama jinsi.

Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka):

- Waxa ay caawimaad iyo adeegyo bilaash ah u haysaa dadka naafada ah si ay si fiican ula soo xiriiraan, sida:
    - Turjubaanka dhagoolaha oo aqoon sare leh
    - Macluumaadka qoran oo ah qaabab kale (daabacaad far waaweyn, dhageysi, qaabab weyn oo ah shaashad, qaabab kale)
- Waxay hayaan adeeg ah luuqado kale oo loogu talagalay dadka u baahan ee uusan afka Ingiriiska u ahayn luuqadda koowaad, sida:
    - Turjubaan aqoon sare leh
    - Macluumaad ku qoran luuqado kale

Haddii aad u baahan tahay adeegyadaas, kala soo xiriir isku-duwaha xuquuqda madaniga ah ee Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) (844-201-6870).

Haddii aad rumeysan tahay in ay Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) ay kuu diyaarin waayeen adeegyadaas ama ay si kale kuu takooreen oo ay sababtuna noqon karto isir, midab, asalkii hore, da', naafanimo, ama jinsi (sida jinsiga uu qof isu aqoonsan yahay naftiisa iyo dookha lammanaha), caqiido diimeed, naafanimo, da', fikrad siyaasadeed, aargoosi ama aargoosasho la xiriirta arrin xuquuq madani ah oo hore, waxaad cabashadadaada u soo gudbin kartaa: Department of Health Services, Attn: Civil Rights Coordinator, 1 West Wilson Street, Room 651, PO Box 7850, Madison, WI 53707-7850, 608-267-4955, TTY: 711, Fakiska: 608 -267-1434, dhscrc@dhs.wisconsin.gov. Waxaad cabashadaada ku soo dirsan kartaa boosto, fakis, ama boostada intarnetka. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo cabashada, isku-duwaha xaquuqda madaniga ah ee Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) ayaa diyaar u ah si aad u hesho caawimaad.

Waxaad sidoo kale cabashada xaquuqda madaniga ah ku soo dirsan kartaa U.S. Department of Health and Human Services (Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadweynaha ee Mareykanka), Office for Civil Rights (Xafiiska Xuquuqda Madaniga), iyo boostada intarnetka oo aad u soo mareyso Kadinka Intarnetka Office for Civil Rights Comlaint Portal (Kadinka Intarnetka ee Xafiiska Xuquuqda Madaniga), oo aad ka helayso https://ocrportal.hhs.gov/ocr/smartscreen/main.jsf, ama ku soo dir boostada ama taleefan ahaan:

U.S. Department of Health and Human Services
200 Independence Avenue, SW
Room 509F, HHH Building
Washington, D.C. 20201
1-800-368-1019, 800-537-7697 (TDD)

Foomamka cabashada waxaad ka helaysaa http://www.hhs.gov/ocr/office/file/index.html.